AMARKA lamb. 22

Ansixinta Xeerka awoodaha Guddonka Dalka iyo tirtiridda Amar-sharciga l. 3 ee 6 Febarayo 1951

MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOMALIYA

XOGHAYAHA GUUD

Kadib markii la arkay sharciga 4 Nofember 1951 lamb. 1301 oo ansixiyey Heshiiska maamulida Dhulka Somaliya ee dalka Talyaaniga kaas oo siiyey awood buuxda ee fuliyeed.

Kadib markii la arkay Amarka lamb. 47 ee 22 Luulyo 1950 oo sineysa Xoghayaha Guud awooda Maamulaha markii uu isagu maqan yahay.

Kadib markii la arkay amarka 6 Febarayo 19521 oo ansixiyey kana dhigay fulin xeerarka iyo maamulka Guddonka Dalka.

Kadib markii laga garwaaqsaday in loo baahan yahay xeerar kala hagga Guddonka Dalka.

Kadib markii la dhegeystay aragtida Guddonka Dalka.

WUXUU AMRAYAA

Qod. 1

Waxaa la ansixiyey lagana dhigay mid fuli kara xeerka 20ka qodob ee howlaha Guddonka Dalka.

Qod. 2

Waxaa la buriyey amar-sharciga lamb 3 ee 6 Febarayo 1951 iyo isbedelladi ka dambeyey.

Muqdisho, 21 Luulyo 1952.

Xoghayaha Guud

Canino

XEERKA AWOODAHA GUDDONKA DALKA

La-Taliyeyaasha iyo Guddiga Kooban

Qod. 1

Xubinimada Guddonka Dalka waa mid lacag laa'an ah. Maamulka Walaayadu waxay siin doonta La taliyeeyasha soo xaadira 1 jeton oo u dhigma So 20 kal fadhigiiba waxaana loo celi doona La-taliyeeyasha deggen meel ka baxsan magaalada Muqdisho kharajka safarka.

Qod. 2

Cid kasta oo rabto in uu ka mid ahaado La-taliyeyaasha waa in uu maraa dhaartaan halkaan ku xusan " *Waxaan ku dhaaranaya in aan u gudan doono si xilkas nimo leh iyo dacaad anigoo hormarinaayo daryeelka ummadda Somaliyeed'*.

Qod. 3

Markii laga reebo marxaladaha gaarka ah, Guddonku wuxuu qabsan doona Shirka Guud ilaa 3 mar sanad walba.

Waxaa lagu guddomin doona dhamaadka faldhig kasta in la doorto Guddiga Kooban oo shaqeyn doono ilaa iyo laga gaari doono shirka ku xiga.

Guddiga Kooban wuxuu ka kooban yahay 12 kursi oo sidan u kala qeybsan:

Somali	10
Talyaani	1
Carab, Hindi Pakistaan iyo waakilada dhaqanka	1

Kursiga ugu dambeyo si wareegto ah ayaan loogu qeybin doona iyadoo laga bilaabayo qowmiyada Carabta.

Guddiga Kooban wuxuu ka baaran degeyaa kana doodi doona go'anadda la horgeyn doono Guddonka Dalka waxayna magacaabi doonta qoraayaashoodu oo horgeyn doonaan arrimahasi Guddonka Dalka.

Maamulaha Guud wuxuu codsi dheerad weydisan kara Guddonka Dalka arrin kasta ama xaaladaha oo Maamulku daneeynaayo.

Qod. 4

Golaha Guud iyo Guddiga Kooban waxaa isugu yeeri karo Guddomiyaha ama codsi a yimaada 2/3 La-taliyeyaasha.

Wargelinta kalfadhigga waa in uu ahaad mid waqti fiicaan lagu wargeliyey La-taliyeyaasha, waa in loo carifo arrimaha laga hadli doono, maalinta iyo saacada shirka.

Haddii La-taliyeyaashu aysan ka soo qeyb gelin Karin kalfadhigaas waa in ay soo wargeliyaan Xoghaynta. Haddii 3 kalfadhig uu ka soo qeyb geli waayo sabab la'aan, waxaa Maamulaha Guud ee Walaayadu ka qaadi karaa xilka La-taliye haddii aysan jirin wax rafcaan ah.

Qod. 5
Kal Fadhiga, Coddeynta iyo Qorallada

Guddomiyaha, Xoghaynta iyo Xafiisyada Maamulka waxay hoos tegi doonaan Qoraaga oo ay Guddiga Kooban magacaabtay kas ooh or keeni doono macluumaadka, iyo wixii kale oo la xiriira howlahiisa.

Qod. 6

Kal fadhiyadu waa furan yihiin kadib markii laga reebo markii Guddomiyaha, ...

Qod. 7

Luqadaha lagu hadli doono doodaha kal fadhiyada ama cod bixinta waa Afka Talyaaniga, Somaliga iyo Carabiga, Qoralladu waxay ku soo bixi doonaan afka Talyaaniga iyo midka Carabigah.

Looma ogola ka qeyb galka kal fadhiyada tarjumeyaalka ka duwan kuwa ku carifan qod. 19.

Qod 8

Guddonku kama hadli karo arrimaha ka baxsan howlaha maalmeedka, kadib markii laga reebo marxaladaha ku qoran qodd. 15.

Qod. 9

Kal fadhi kasto waa in uu yeesho qoraal rasmi oo haddi uusan jirin uu noqon doono mid aanan wax ka soo qaad lehayn, kaas oo lagu qori doonon magacyada La-taliyeyaasha soo xaadiray, su'aalada la soo jeediyey iyo go'aanka Guddonka.

Qod. 10

Qorallka rasmiga ah waa in uu saxiixa Guddomiyaha iyo Xoghayaha.

Kal fadhigu wuxuu ku bilaabanayaa akhriska qoraalladi kal fadhigii ka horeeyey, haddii uusan jirin wax su'aal ah waxaa lagu soo gebigebeen doona mid la aqbalay.

Qod. 11

Doodu waxaa fursad hadal siin doono Guddomiyaha oo keliya.

Qod. 12

Coddeyntu waa mid loo istaago ama mid qarsoodi ah.

Qod. 13

Si go'aanadu u noqday mi ansax ah waa in ay xaadir yihiin ugu yaraan 23 La-taliye ee Golaha Guud iyo 7 xubin ee Guddiga Kooban. Aragtiyada la soo jeedi si tiro guud oo ay ka reeban tahay arrimaha la xiriira Heshiiska Walaayada oo u baahan in la helo tirada ugu badan.

La taliye kasto wuxuu xaq u leeyahay in aragtiisa lagu qoro qoraalka rasmi ah, codkiisana la qoro iyo asbaabta codeyntiisa.

Qod. 14

Waxaa ka reeban La-taliye kasto in uu ka qeyb galo kal fadhi loogaga doodaya arrimo isaga khuseeya.

Madaxda Walaayahad iyo saraakiishooda way ka soo qeyb geli karaan kalfadhiyada laakin ma laha xaq in ay codeeyaan.

Qod. 15

La-taliye kasta kadib markii ay dhamaato dood maalmeedka kal fadhiga wuxuu awood u leeyahay in uu horkeeno aragtiidisa arrimaha khuseeya horumarinta bulshada, kuwaas oo aanan ku jirin dooda maalinta. Guddomiyaha wuxuu awood u leeyahay in uu furo doodasi hadddii uu u arko wax ku ool.

Qod. 16
Ilaalinta Habsami u Socda kal Fadhiga

Muddada ay socoto dooda kal fadhigu looma oggola in dadka ka soo qeyb galay ay hadlaan ama calaamooyin didma ama ogolaansho ah suubiyaan.

Qod. 17

Guddomiyuhu wuxuu awood u leeyahay in uu suggo dhowrista shurucda si loo helo nidaam wanaagsan ee dooda iyo coddeynta.

Sidaas awgeed wuxuu awood u leeyahay in uu ka bixiyo La-taliyaha ama dadka oo uu arko in ay qalaaso wadaan, wuxuu kala diri karaa kal fadhiga ama dib ayuu u dhigi karaa.

Qod. 18
Xoghaynta

Xoghayuhu oo ka mid ah saraakiisa Maamulka Waalayada wuxuu awood u leeyahay in uu ka shaqeeyo isku xiriirinta Guddiga Kooban iyo xubnaha kale si loo ogaado howlaha Guddigaasi muddada u dhexeysa kalfadhiya iyo in macluumaadkaasi gaarsiiyo shicibka.

Qod. 19

Xoghaynta waxaa ka tirsan 4 tarjume oo rasmi ah 2 Somali ah iyo 2 Carabi ah iyo laba shaqaale Somali ah.

Qod. 20

Xoghayntu waa in ay keedisaa keyd arrimaha xafiis kasta ee Maamulka Walaayada.

Muqdishu, 21 Luulyo 1952.

Xoghayaha Guud

Canino